



# Addeegyadii lagu qeybinayey kumbuyuutarada iyo kuwa la bedelanayo waxaa loo wareejin doonaa maalmaha Isniinta iyo Khamiista

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Sida aad la socotaan sanad-dugsiyeedkii 2019-20 wuxuu ku dhow yahay gebogabo iyada oo aan ku jirno xaalad aan hore inoo soo marin, waxa aan rabnaa inaan idin wargelino in aan jarnay maalmihii la qeybinayayey iyo maalmihii la bedelanayo kumbuyuutarada dugsiyada degmadu leeyihiin ee barnaamijka waxbarashada ardaydu guryaha ku qaataan PPS-HD.

Iyada oo baahiduna hoos u dhacayso, waxa aan maalmihii u bedeli doonaa labo maalmood qoysaskii la siinayey addeega ardayga aan wali guriga ku haysan kumbuyuutar, ama kuwa u baahan in loo bedelo kumbuyuutarada aan sida fiican u shaqeyneyn ee u baahan in loo bedelo. Jadwalka cusubi wuxuu ka bilaabmayaa maalinta Isniinta, bisha Maayo 18keeda:

- **Goorma:** Isniin iyo Khamiis, 9 subaxnimo -1 duhurnimo
- **Goobta:** Xafiiska Degmada PPS (501 N. Dixon St). Fadlan waxaad tegtaa qeybta hoose ee barxada baabuurta la dhigto, taasi oo laga soo galo dariiqa N. Larrabee Ave.
- **Waxaad soo qaadataa:** Aqoonsiga ardaygaaga ee iskuulka (ID) ama Lambarka ID ardaygaaga. Haddii aad rabto inuu lagu bedelo kumbuyuutar, fadlan waxaad keentaa midka lagu bedelayo iyo xadhigii dabka uu u isticmaalayey
- **Fadlan waxaad ogaataa:** Waxa aan weydiisaneynaa qof kasta in uu isticmaalo habka dadku ay kala fogaanayaan, ugu yaraan waa in koox waliba ay isku jiraan 6 tallaabo iyo waliba inaad afka soo dabooshaa, haddii ay suurtagal tahay.

Fadlan waxaad ogaataa haddii ay ku haysato cilad farsamo oo aanad hubin in aad u baahan tahay in aad bedesho kumbuyuutarka, waxaad sidoo kale soo wici kartaa:

- **Waxaad soo wacdaa:** 503-916-3375
- **Email:** [support@pps.net](mailto:support@pps.net)
- **Shabakada:** [pps.net/student](https://pps.net/student)

Waxaan kaaga mahadcelineynaa samirkaaga iyo dadaalkiina sidii aan dhammaanteen uga bixi lahayn caqabadaha xanuunka saf mareenka ah ee coronavirus.

Xafiiska Teknoolajiyada iyo Addeegayada Xogta